



ABN: 85 802 283 515

23 March 2020

Waalidiinta iyo daryeelayaasha xushmada leh,

COVID -19 -Talooyinkii ugu danbeeyey iyo Waxbarshada Guriga

Waxaan idiinla soo xidhiidhay maanta ,anigoo ah maamulaha iskuulka A.I.I.C

In aan idiin soo gudbiyo warar muhiim ah oo la xidhiidha xanuunka Corona-Virus-19.

Raiisal wasaaraha ayaa hada ku dhawaaqay in iskuuladu furanan yihiin ayna furnaan doonaan ilaa inta la gaadhayo dhamaadka termka.

Waxaa naga go'alaalinta caafimaadka ardayda iyo shaqaalaha.

Waxaanu mar horeba qaadnay talaabooyin lagu yaraynayo isdhexgalka ardayda, kor u qaadista nadaafada iyo in hoos loo dhigo fursadaha xanuunkani ku fidayo .

Iskuulka AIIC wuu furnaanayaa **laakiin laga bilaabo 24/3/2020 waxaan jeclaan lahaa in waalidiintu ay caruurtooda guriga ku haystaan haday awoodaan.**

Waxaanu qaybinay duruustii ama casharadii ay ardaydu guriga ku baran lahaayeen waana balan qaadaynaa inaan sii wadno.

Ardayda dugsiga sare(secondary) waxay haystaan fursad ay ku galaan computerka si ay u helaan buugaagta iyo waxyaalaha kale ee la xidhiidha waxbarshadooda.

Macalimiintu waxay si aan daalis lahayn u dhameeyeen howshaas waxayna waxka bedeleen habkii ardayda loo qiimayn jirey (assessment).

Arday seconderiga ee weli haysta howl weli aan la sixin ama la qiimayn (assessment) hala xidhiidho macalinkiisa si loogu cadeeyo.

Meesha ugu nabad gelyada badan xiligan waa GURIGA.

Aan ku celiyo weli mahayno AIIC cid xanuunka laga helay ama looga shakiyey.

Hase yeeshee waalidka waxaan ka codsanyanaa inay ilmaha guriga ku haystaan haday awoodaan. Si aan u xoojino talaabooyinka lagu xaqiijinayo caafimaadka bulshada.

Fadlan u hogaansama talada wasaarada caafimaadka ,Guryaha jooga intaad awoodaan ,hadada idinka iyo ilmihiiinu jiro dareentaan debeda ha u bixina.

Qofba qofka kale ha u naxariisto iyohana u naxariisto dadka jilicsan ee bulasha

Christine Harman

Principal